

COVID-19 (korona fayras) Su'aalaha cabashooyinka toddobaadlaha ah

Waxa la dhaqangaliyay Xeerarka degdegga ah ee khuseeya shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha ay saamaysay COVID-19. [Wax badan ka ogow bogga COVID-19.](#)

Macluumaadka muhiimka ah (*la cusboonaysiiyay Agoosto 5, 2020*)

- "waiting week" (Toddobaadka sugitaanka) waa laga dhaafay sheegashooyinka lasoo gudbiyay ama ka dib Maarso 8, 2020 taasoo qayb ka ah xeerarka degdegga ah ee COVID-19.
- Shaqo raadintu hadda qasab maaha. Hawlqabadka inaan qofku warbixin raadin dib uma dhigeysa macaashkaaga.
- [inaad online ku buuxiso](#) ayaa ka dhakhso badan taleefanka Waxaan wajahaynaa culaysa wicitaan xaga taleefanka ah, baahida oo aad u sarreeysa awgeed, macaamiil badanina ma awoodaan inay ka gudbaan.
- Marka lagu daro su'aalaha caadiga ah ee usbuuclaha ah ee Caymiska Shaqo La'aanta (Unemployment Insurance, UI) ee hoos ku xusan, kaalmada codsadayaasha Shaqo La'aan ee xiligan Faafa darani jiro (Pandemic Unemployment Assistance, PUA) waa inay [ka jawaabaan su'aalaha dheeriga ah si loo caddeeyo u-qalmitaanka dheefaha](#). Tani waa rabitaanka sharciga federaalka.

Booqo [bogga su'aalaha u-qalmitaanka PUA iyo hagista](#)

Su'aalaha aan kugu weydiinno sheegashadaada toddobaadlaha ah

Su'aalaha aan ku weydiineyno markaad xareyneysa sheegashadaada toddobaadlaha ah waa isku mid haddii aad ku xaraysato khadka tooska ah ama taleefan.

- Ma awooday jir ahaan diyaarna ma u ahayd inaad shaqayso maalin kasta?
 - Haddii aad shaqo la'aan tahay COVID-19 awgii, sababtoo ah xiritaanka ganacsiyada ama aad halis weyn ugu jirto inaad qaado caabuqa COVID-19 oo lagugula taliyay inaad is karantiisho shakhsi ahaan, oo aad wali kaga jawaabayso "Haa" su'aashan.
- Ma sameysay shaqo raadin firfircoon, sida lagu faray, inta lagu jiro usbuuca aad hada sheeganeyso?

- Ilaa laga oggolaado codsigaaga hadda taagan, helitaankaaga dheefaha shaqo la'aanta waxay kaa dooneysaa inaad si firfircoon shaqo u raadiso.
 - **Waa kuwaan qaar ka mid ah talooyinka kaa caawinaya inaad buuxiso shuruudahaaga shaqo raadinta inta lagu guda jiro COVID-19 dillaacay:**
 - Ka codsi shaqo halkaan [WorkSourceWA.com](https://www.worksourcewa.com).
 - Ku soo gudbi codsiyada shaqo adigoo adeegsanaya atoorada raadinta sida Indeed, CareerBuilder iyo Monster, si aad u magacawdo waxyar.
 - Wicitaanka loo-shaqeeyaha aad taqaanid inay cid shaqaalenayaan shaqooyinka suurtagal ah.
 - Dhameystirka aqoon isweydaarsiyada la heli karo ee ay bixiyaan [WorkSource](https://www.worksource.com).
 - **Ogow:** Shaqada aad codsanaysaa waa inay noqotaa mid aad khibrad hore u leedahay, tababar u haysato ama aqoonteda leedahay. Tan waxa lagu qeexaa shaqada kugu haboon.
 - Waxaan tixgelinsiin doonaa dadaal kasta oo la sameeyo si loo buuxiyo shuruudaha shaqo raadinta marka la go'aaminayo u-qalmitaanka shaqo la'aanta ee toddobaadlaha ah.
- Haddii aad kaga jawaabto "haa" su'aasha ku saabsan shaqo raadinta firfircoon oo aanad ka cudurdaaran shuruudahaaga shaqo-raadinta, waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo dheeraad ah. Waa inaad caddeysaa inaad si shakhsi ah ula sameysay la xidhiidhay badan loo shaqeeyaha kugu haboon toddobaad kasta (halkaan [WorkSource](https://www.worksource.com) ama [American Job Center](https://www.americanjobcenter.com) gobol kale), oo aad xogtan ku diwaangalisay diwaankaaga shaqo raadinta.
- Dacwad-oogayaasha ka baxsan gobolka sidoo kale waa inay diyaar u noqdaan inay diwaangaliyaan xiriirada shaqo-raadinta toddobaad kasta oo la dalbado.
- Xidhiidhaha loo shaqeeyaha, waxaa lagaa doonayaa inaad ka bixiso waxyaabaha soo socda diiwaankaaga shaqo-raadinta xiriir kasta oo la sameeyay: taariikhda; magaca ganacsiga iyo cinwaanka oo dhameystiran; lambarka taleefanka ganacsiga ama emaylka; sida loola xidhiidhay; qofka aad la xiriirtay; iyo nooca shaqada aad raadineysay.
- Hawlaha shakhsiga ah booqo (halkaan [WorkSource](https://www.worksource.com) ama [American Job Center](https://www.americanjobcenter.com) ee gobolka kale), waxaa lagaa rabaa inaad ka keento waxyaabaha soo socda diiwaankaaga shaqo raadinta hawl kasta: taariikhda, xafiiska iyo sharaxaadda waxqabadka.
- Did you refuse any offer of work or fail to go for a scheduled job interview?
- Miyaad dalbatay ama heshay magdhowga shaqaalaha ama dhibbaneyaasha dembiyada?*
- Ma dalbatay ama wax isbeddel ah ma ku yimid dakhliga hawlgabka? *
- Miyaad heshay ama heli doontaa lacagta fasaxa loo-shaqeeyahaaga caadiga ah maalin kasta oo ka mid ah usbuuca oo aad dalbato? *
- Miyaad heshay ama heli doontaa lacagta fasaxa maalin kasta ee usbuuca oo aad dalbato?*

- Miyaad heshay ama heli doontaa lacagta ogaysiin mushahar joojin maalin kasta oo todobaadka ah oo aad dalbato?*
- Wali ma ku shaqaysay xeer beegti ahaan?*
- Miyaad gumatay waajibaadka keydka militariga ama ilaalada qaranka in kabadan 72 saacadood oo xiriir ah?*
- Si shakhsi ah ma u shaqaysatay wali?*
- Todobaadkii u danbeeyay cid ma u shaqaysay?*

*** Ka warbixi dakhliga ku soo gala ee usbuuca aad shaqaysatay, maahan waxa aad toddobaadkii aad heshay iyaga.** Ka warbixi isu gaynta dakhliga ku soo galay intaan waxba lagaa jarin. Ka war bixi dakhliga ku soo gala markaad iskaa u shaqaysato? Sidoo kale waxaa lagu weydiin doonaa wadarta saacadaha ama maalmaha aad shaqaysatay.

Shaxda wixii laga jaray dakhliga

Si lagaaga caawiyo inaad go'aamiso inta lagaa goynayo dalabkaaga toddobaadlaha ah, waad soo dejisan kartaa [jaantuska ka jarista Dakhliga hadda jira](#) (Earnings Deduction).

Haddii aad shaqaysay todobaadka gudihiisa u diyaar garaw inaad sheegto:

- Dakhliga aad heshay todobaadkaas, xataa haddii aan lacagta lagu siin wali. (Dakhliyada waxaa kamid ah dhamaan magdhowga aad ku kasbatay adeegyada shaqsiga ah, oo ay kujiraan mushaharka gudiyada iyo gunooyinka, qiimaha lacageed ee magdhowga ee lagu bixiyo waxkasta oo aan aheyn lacagta, iyo qiimaha macquulka ah ee bakhshiishka.)
- Imisa saacadood ayaad shaqaysay todobaadka.
- magaca ganacsiga loo shaqeeyahaaga.
- Ciwaanka ganacsiga loo shaqeeyahaaga.
- Taariikhda aad bilawday shaqada todobaadkaas.

Kadib markaag galisay dakhligaaga

Waxa lagu waydiin doona "miyaad rajaynaysaa inaad u shaqayso loo shaqeeye la mid ah kan todobaadka soo socda?" Haddii aad ku jawaabto "maya" waa inaad sheegtaa sababta:

1. Shaqo la'aan
 - Tusaale ahaan, loo shaqeeyuhu wuxuu xirey ama yareeyey shaqaalaha sababta oo ah waxa xirmay ganacsigiisii ama jihatnta caafimaadka dadweynaha inta lagu gudajiray dillaaca COVID-19.
2. Saacadaha shaqada oo la yareeyay, waayo shaqo ma jirto
3. Shaqada laga eryay
4. Shaqo joojin aad samaysay
5. Sababo kale oo la mid ah

Ma haysaa dakhli kale oo laga warbixin karo?

Haddii aanad hubin in dakhligaaga laga warbixin karo, ka eeg liiska hoose bogaga u dhexeeya 27-28 ee [Buug-gacmeedka loogu talagalay Shaqaalaha Shaqo La'aanta ah \(Handbook for Unemployed Workers\)](#) (PDF, 2.9MB).

Marka aad dhamayso jawaabahaaga, nidaamku wuu kula hadli doonaa ama fariin ayuu ku siin doona "**Dalabkaagii waa la aqbalay (Your claim has been accepted).**"

Dakhliga laga warbixin karo wax aka mid ah:

1. Dakhliga ganacsiga kuu gaar ka ah.
2. Nooc dakhli bixin ah oo bedeli karta lacag kaash ah sida kirada ama qolka iyo guddiga.
3. Gunooyinka lagu kabo shaqadii la qabtay todobaadkaas.
4. Bakhshiishka nooc kasta oo uu yahay.
5. Fasaxa lacagta la bixiyo, bixitaanka fasaxa iyo xanuunka.
6. Kaydka Militariga iyo Ilaalada Qaranka ayaa bixiya haddii aad shaqeysay wax ka badan seddex maalmood oo isku xigta.
7. Dakhliga adeegga waajibaadka xeerbeegtida.
8. Dakhliga ka soo baxa daraasadda shaqada ee gobolka (kuma jiraan lacagaha xilka IV).
9. Lacag uu bixiyo loo shaqeeye, sida dib u dhaca (oo ay kujirto dib u bixinta wakhti luminta ama dalabka magdhawga shaqaalaha) toddobaadyo aad dalbatay.

Haddii aad khaladay dalabkaagii todobaadka

Haddii aad khalad samayso markii aad buuxinaysa sheegashadaada toddobaadlaha ah, waxaad bilaabi kartaa wakhti kasta ka hor intaadan maqlin ama arag, "**dalabkaaga waa la aqbalay.**" Badanaa kiisasak, waxaad fursad uheli doontaa inaad dib u saxdo khaladaadka inta aad gudbinayso dalabkaaga.

Marka aad ogaato khaladkaaga **kadib** gudibnta dalabkaaga todobaadka, waxa aad u baahantahay inaad wacdo oo la hadasho wakiil. La hadal [800-318-6022](tel:800-318-6022) si aad u saxdo khaladkaaga. Wixii macluumaad ah ee la xiriira xarunta dalabaadka hadda iyo saacadaha la aadayo: <https://esd.wa.gov/unemployment/unemployed-workers-contact>

Haddii aad ku guuldaraysato inaad la hadasho carunta dalabaadka si aad khaladkaaga u saxdo waxay keenaysaa in **dakhli dheeraad ah lagu siiyo dakhligaagana la diido.**

Su'aalaha aan kugu waydiin doono PUA ee dalabkaaga todobaadka.

Su'aalahani waa sababta COVID-19 kuwaas oo qof u sahlaya inuu xaq u yeesho PUA. Si daacad ah uga jawaab su'aasha. Waxaa u baahan Sharciga Caawimaada, Gurmada iyo Ilaalinta Dhaqaalaha ee Korona Fayras (Coronavirus Aid, Relief, and Economic Security, CARES) codsiyadana waxaa baaritaan ku samayn karta Waaxda Shaqada ee Mareykanka (U.S. Department of Labor). Haddii aadan u-qalmin PUA, waxaad u-qalmi kartaa inaad dib-u-codsato dheefaha shaqo la'aanta caadiga ah.

Su'aalahani waxay khuseeyaan oo keliya usbuuca aad dalbanayso. Waxay si dheeraad ah ula socdaan dalabka toddobaadlaha ah ee UI. Waa su'aalo haa ama maya lagaga jawaabayo Tilmaamaheena [COVID-19 shaqo la'aanta](#) wuxuu bixiyaa macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan ka jawaabida su'aalaha. laga bilaabo bogga 28.

Haddii aad gudbisno dalabkaaga toddobaadlaha ah ee PUA si elektaroonig ah adoo adeegsanaya eServices, waad kaga jawaabi kartaa su'aalaha u-qalmitaanka khadka tooska ah. Haddii aad ku soo gudbisno dalabkaaga adoo adeegsanaya nidaamkayaga taleefanka otomaatiga ah, waxaan kuu soo diri doonaa su'aalo-weydiin ay tahay inaad buuxiso oo aad isla markaaba soo noqotid. Waa inaan helnaa jawaabahaaga oo aan ka baaraandegnaa jawaabahaaga si laguugu tixgeliyo inaad xaq u leedahay PUA Waxaa laga yaabaa inaan ku siino faaiidooyinka si shuruudi xidhantahay inta aan sugayno jawaabtaada, laakiin haddii aanaan helin jawaabahaaga su'aalaha, waa inaad dib noo siisaa. **Su'aalaha way kala duwanaa karaan haddii aad ku soo gudbisno sheegashadaada toddobaadlaha ah taleefan. Waxaan si adag kugula talineynaa inaad ku xareyso sheegashadaada PUA toddobaadle eServices haddii ay suurogal tahay.**

[Su'aalaha u qalmida iyo hagitaanka PUA](#)

Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada) waa barnaamij/shaqo abuurte baxsha fursad loo siman yahay. Taageerooyinka kaalmaatiga iyo adeegyadu waa diyaar markii ay codsadaan shaqsiyaadka naafada ah. Adeegyada caawimaada luuqada ee dadka aan si fiican u aqoon luuqada Ingiriiska ayaa si bilaash ah lagu helayaa. Adeegga Dhagoolayaasha Washington: 711